



Helsinki

**Dhibaatooyinka
waxbarasho ee
ballaaran oo lo yaqaano
cilladda horumarka ee
noocyada badan**

Qeexidda iyo cudur-sheegista

Cilladda horumarka ee noocyada badan (F83) waxaa loola jeedaa in horumarka da'da u dhigma si ballaaran dib looga dhacay oo dib u dhacaasina uu saameeyay qaybo badan oo horumarka ah (horumarka luqadda, awoodda qiimeynta, awoodda dhaqdhaqaaqa, waxbarashada). Ilmuhu wuxuu isla mar la dhibaateysnaan karaa feejignaanta ama waxqabadka uu qayrkii la wadaagayo.

Ilmo kasta hormarkiisu waa mid shaqsigiisa gaar u ah. Cilladda dhanka horumarka marka laga hadlayo waa marka ilmaha horumarkiisu uu si wayn uga duwanyahay qayrkii oo dhibaatooyinka haystaa ay saameyn ku leeyihiin awoodda waxqabadka ee nolosha maalinlaha ah ee ilmaha. In la aqoonsado cilladda horumarka oo laga aqoonsado kala duwanaanshaha caadiga ah ee horumarka waa muhiim, si ilmaha loo siin karo taageero ku habboon.

Dhibaatooyinka uu ilmuhu nolosha maalinlaha ah kala kulmo noocyada kala duwan ee horumarka

- **Dhibaatooyinka luqaddu** waxaay adkeyn karaan awoodda uu ilmuhu naftiisa ku muujinayo isaga oo hadal u adeegsanaya ama waxaay adkeyn karaan fahankiisa hadalka. Ilmaha hadalkiisa ayaa noqon kara mid yar, kala dhantaalan ama aanan la fahmi karin. Hagitaanada dheer ama eray-bixinada adag ayaa ilmaha ku adkaan kara inuu fahmo. Dhibaatooyinka luqaddu waxaay badanaa dugsiga saameyn ku yeeshaan barashada akhriska iyo qoraalka ama fahanka waxa uu ilmuhu akhriyay.
- **Dhibaatooyinka qiimeynta iyo fahamku** waxaay ilmaha ku adkeyn karaan qiimeynta, wax suuqaysashada ama fahanka qaybaha kala duwan ee ay sii kala yihiin qaybaha kala duwan ee agabka ama ashyaada, cabirka iyo fahanka wayaabaha faahfaahsan. Nolosha maalinlaha ah arrimahan waxaay saameyn karaan labisashada oo ilmaha ku adkaata, wax dhisidda, suuqaysashada iyo qiimeynta wakhtiga iyo barashada xisaabta.
- **Dhibaatooyinka dhaqdhaqaaqu** waxaay u muuqdaan dhibaatooyin la xidhiidha barashada shaqada dhaqdhaqaaqa xubnaha jirka ee dhaqdhaqaaqa sii yar ama farsamada u baahan. Nolosha maalinlaha ah dhibaataadaasi waxaay u muuqan kartaa ilmaha oo si aan miisaanayn ama farsamo lahayn u dhaqaaqaya, inuu meelo jiidho, in uu taxaddar badan leeyahay iyo in tusaale ahaan weelka cuntada lagu cuno, dharka badhamada la xidhayo ama maqaska isticmaalkooda oo ku adag.
- **Dhibaatooyinka feejignaanta iyo hagitaanka waxqabadku** wuxuu u muuqan karaa sal-fudeyd ama in ilmaha ay ku adagtahay inuu u soo jeesto arrinta looga baahanyahay. Dhibaataadu waxaay u muuqan kartaa in ilmaha ay ku adagtahay inuu waxqabad bilaabo ama inuu joojiyo iyo inuu qorsheeyo waxqabadkiisa. Dhibaatooyinka feejignaanta iyo hagitaanka waxqabadku waxaay la xidhiidhi karaan firfircoonida xad dhaafka ah ama dansanaanta ilmaha.
- **Dhibaatooyinka awoodaha la dhaqanka** ilmaha ka haystaa waxaay u muuqan karaan in ilmaha ay ku adagtahay inuu qiimeeyo dareenka iyo hab-aragtida dadka kale. Waxaa ilmaha ku adkaan karta inuu aqoonsado qaababka kala duwan ee codka dadku u isticmaalaan iyo in uu wajiga iyo ficilada dadka akhristo. Dhibaatooyinka la dhaqanka bulshadu waxaay badanaa saameeyaan awoodda uu ilmuhu qayrkii ula ciyaari karo ama waxqabad ula wadaagi karo.



Baadhitaanada

Fikradda dhameyskatiran ee horumarka ilmaha khuseysa waxaa la helaa markay xirfadleyaal kala duwan oo daryeelka caafimaadka ka mid ah ay ka wadashaqeeyaan qiimeynta xaaladda ilmaha. Xaaladda ilmaha waxaa qiimeyn kara cilmu-nafsi yaqaan/newrolojist, terabiistaha waxqabadka, terabiistaha hadalka, fisioterabiiste, kalkaaliso iyo dhakhtar. Qiimeynta xirfadleyaasha ka

sakow waxaa macluumaad dheeraad ah oo aad u muhiim ah aqoonta ilmaha iyo awooddiisa waxqabad looga helaa warbixinta iyo sharraxaadda ay bixiyaan guriga iyo dugsigu. Baadhitaanada ayuu dhakhtarku ku salleynayaa marka uu bayaaminayo cudur-sheegga cilladda horumarka, xirfadleyaasha kala duwana waxaay qiimeynayaan baahida baxnaaninta iyo waxqabadyada taageerada.

Baxnaaninta

Noocyada baxnaaninta ee caadiga ah waxaa ka mid ah terabiyada hadalka iyo terabiyada waxqabadka. Ujeeddada baxnaanintu waa in la taageero horumarka iyo korriinka ilmaha iyo in loo suurta galiyo ka qaybqaadashadiisa nolosha maalinlaha ah. Hiigsiyada baxnaaninta si gaar ah ayaa loogu qoondeynayaa ilmaha waxaana lagu salleynayaa baahida ilmaha. Waalidka waxqabadkooda firfircoon ayaa door muhiim ah ku leh broseeska baxnaaninta. Iyagu udubdhexaad ayaay u yihiin in aqoonta baxnaaninta lagu helay loo gudbiyo nolosha maalinlaha ah ee ilmaha. Terabiisteyaasha baxnaaninta ku shaqada leh ayaa badanaa ku haga shaqaalaha barbaarin-horaadka taageerada ilmaha ku habboon. Baxnaanintu waa mid da'da dugsiya inta uu ilmuhu ka yaryahay xoogga loo saaro.

La socodka

Hiigsiyada baxnaanintu inay hirgaleen iyo horumarka ilmaha waxaa loola socdaa si joogto ah. La socodkaasi wuxuu keeni karaa in cudur-sheegista ilmuhu ay sii faahfaahansanto. Mararka qaarkood qaybo ka mid ah awoodaha ilmaha ayaa xoojisma, waxaana dhacda in dhibaatooyinka horumarku aanay sii ahaanin kuwo ballaaran. Haddii dhibaatooyinka horumarka ee ilmuhu ay wali dhibaato culus nolosha maalinlaha ah ilmaha ku sii hayaan xattaa isaga oo baxnaanin iyo waqabad taageero ah la siinayo, waxaa dhici karta in cudur-sheegu uu isku baddalo naafonimo garaadka ah oo khafiif ah. La socodku sida caadiga ah wuxuu sii socdaa inta baxnaanintu ay socoto. Markaas kaddib la socodku wuxuu u wareegaa daryeelka caafimaadka ee dugsiya, halkaas oo haddii loo baahdo lagula tashan karo newrolojistka ilmaha ama saykayatriga ilmaha khubarada ku tukhasusay.



Waxqabadka taageerada ee barbaarin-horaadka iyo dugsiga

Ilmuhu wuxuu xaq u leeyahay in uu taageero helo inta uu ku jiro barbaarin-horaadka iyo waxbarashada dugsiga hoose-dhexe. Taageeradu waxaay noqon kartaa mid kooxda ama ilmaha gaar u ah waaayna noqon kartaa tusaale ahaan taageerada qayb wakhtiga ka mid ah macallinka baahida gaarka ah uu bixiyo ama taageerada wakhti buuxda macallinka baahida gaarka ah uu ku bixiyo koox yar. Macluumaadka waxbarashada waa la kala sooci karaa si uu ugu habboonaado ardeyga waxyaabaha loo hiigsanayo ee gaarka ah ama casharada ayaa loogu sameyn karaa ardeyga si ku habboon aqoontiisa iyo awooddiisa wakhtigaas. Waxaa sidoo kale ilmaha la siin karaa

macluumaad waxbarasho oo luqad faseex ah ku qoran iyo agabyo waxbarashada lagu kaalmeynayo oo la taaban karo iyo kuwo aragtida ku salleysan. Waxbarista waxaa lagu dadaadalayaa in looga faa'idaysto awoodaha ilmaha. Horumarinta aragtida wanaagsan ee uu ilmuhu iska haysto iyo in niyad uu u helo waxbrashada waxaa muhiim u ah inuu khibrado guuleysi ah helo. Waxaa daruuri ah in ilmuhu uu dareemo inuu isagu wax yaqaano oo uu waxbaranayo iyo in shaqsiyen uu qiimo leeyahay. Waxqabadka taageerada ee dugsiga waxaa si wadajir ah loogala shaqeynayaa macallimiinta iyo qoyska iyo cilmu-nafsi yaqaan ama cilmu-nafsi yaqaan newrolojiga ku tukhasusay.

Taageerada uu qoysku bixinayo

Shaqada ugu muhiimsan ee waalidku uu leeyahay waa inuu ilmaha u suurta galiyaa bey'ad ammaan ah oo jaceyl leh oo uu ilmuhu ku kori karo. Carruurta oo dhan ayaa ka faa'ida nolosha maalinlaha ah ee joogteysan, jadwalka iyo nidaamka maalinlaha ah iyo inay nolosha maalinlaha ah tahay mid la sii qiyaasi karo. Hurdada iyo raashinka ku filan, waxqabadka noocyada badan iyo ciyaarta xorta ah dhammaan waa shardiyaada aasaasiga

ah ee korriinka iyo horumarka ilmaha. In nolosha maalinlaha si fiican u socoto iyo waalidnimada haddii loo baahdo waxaa taageero looga heli karaa cidda daryeelka bixinaysa ama adeegyada magaalada Helsinki ee Carruurta iyo qoysaska. Nolol-wanaagga waalidku wuxuu suurta galinayaa in ilmuhu uu helo qiimeyn ku filan oo laga taageero korriinkiisa iyo horumarkiisa.

Qaabilaadaha gaarka ah ee ilmaha
hel.fi/lasten-erityisvastaanotot

Helsinki

Helsinki

Qaabilaadaha gaarka ah ee ilmaha, Magaalada Helsinki 2026

Susanna Leivonen, newrolojistka carruurta, LT

Alisa Olkinuora, cilmu-nafsi yaqaan, PsM

Monimuotoinen kehityshäiriö eli laaja-alaiset oppimisvaikeudet

Esitteen kieli: Somali